

ABAALCELINNO

Ra'yiga Kooxda Kajawaabidda Xaaladda Degdegga ah ee Bulshada (CERT) waxaa isku duwey oona fuliyey Waaxda Dabdemiska ee Magaaladda Los Angeles (LAFD) sanadkii 1985. Waxay aqoonsadeen in muwaaddiniintu ay iyagu uun isku tiirsanaan doonaan inta lagu jiro wejiga ugu horreeya ee musiibada halaagga leh. Mar haddii ay sidaa tahay, waxay LAFD goosatay in xoogaa tababbar ah oo asaasi ah oo la siiyo muwaaddiniinta caadiga ahi ay wax ka geysan karayaan samatabbaxa ay isa sii celin karaan muwaaddiniintu inta aanay meesha soo gaarin samatabbixiyeyaasha xirfadleyda ah iyo sahay caawineedba. Dhulgariirkii Whittier Narrows ee dhacay 1987 ayaa soo bandhigay khatarta baahsan ee musiibo loogu jiro eek a jirta California. Sidoo kale, waxay caddaysay baahida loo qabo in la tababbaro shacabka si ay marka hore ee ay musiibo dhacdo iyagu isula tacaalaan.

Barnaamijka tababbarka ahaa ee ay unugtay LAFD ayaa ay caddaatay in ay faa'iido xad-dhaaf ah leeyihiin ilaa iyo xad ay FEMA [Federal Emergency Management Agency] dareentay in barnaamijka bulshooyinka qaranka oo dhan laga dhaqan gesho. 1994tii, ayaa EMI [Emergency Management Institute] oo la shaqaynaysa LAFD, waxay sii ballaarisay qoraallada CERT si ay uga dhigaan kuwo lagu dabbikhi karo dhamaan khataraha jiri kara oo dhan.

2003tii ayuu Madaxweyne Bush ka codsaday dhamaan dadka Maraykanka ahi in ay adeegga dalkooda u mutaddawacaan. Barnaamijka Citizen Corps ayaa la abuuray markaa si uu u horboodo dedaalladaa oo markaa laysku duwo awoodda dhamaan shaqsiyaadka iyadoo la tacliiminayo, la tababarayo, oo laga qaybgelinayo adeeg mutaddawacnimo si bulshooyinka looga dhigo kuwo nabdoon, xooggan, si wacanna ugu diyaarsan in ay u babac-dhigaan khataraha argaggixisannimo, kuwa dembiilennimo, arrimaha caafimaadka guud, iyo musiibooyinka nooc kasta. CERT ayaa waxa loo xushay in ay noqoto mid ka mid ah barnaamijyada asaasiga ah ee la siiyo bulshada Maraykanka ah si ay caqabaddan u waajahaan.

EMI waxay jeclaan lahayd in ay u mahadceliso dadka hoos ku qoran oo iyagoo koox-yool-leh ah ka qayb-qaatay in ay muraajiceeyaan oo qiimeeyaan qormooyinka CERT.

**KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE BULSHADA
ABAALCELINNO**

Lt. Stewart Anderson
Natrona County Emergency Management Agency
Casper, WY

Robert Bohlmann
York County Emergency Management Agency
Alfred, Maine

Lt. Bill Empey
City of Rochester Fire Department
Rochester, New York

Chandra Fox
Emergency Services Coordinating Agency
Edmonds, Washington

Rachel Jacky
Portland Fire Bureau
Portland, Oregon

ABAALCELINNO (WELI SOCDA)

Dale Kloes
Whatcom County Sheriff's Office
Bellingham, Washington

Captain Don Lee
Los Angeles Fire Department
Sherman Oaks, California

Frank Lucier
North American Emergency Management
Napa, California

Captain Robert Palestrant
Miami-Dade Fire Department
Miami, Florida

Chief Harry Small
Pompano Beach Fire Department
Pompano Beach, Florida

EMI waxaa kaloo ay jeceshahay in ay u mahadceliso dadkii muraajiceeyey qoraallada qabyada ah: Mark Penn, Arlington Fire Department; John Moede, LA City Fire Department, Corey Barton, Ogden Fire Department; Joel Kasprzak, Portland Fire and Rescue, iyo Kevin Shanders, Portland Fire and Rescue.

**XOG KU SAABSAN TABABBARKA KOOXDA KAJAWAABIDDA XAALADDA DEGDEGGA AH EE
BULSHADA (CERT)**

Haddii la heli karo, shaqaalaha adeegyada gurmada ah ayaa aadna ugu tababbaran uguna iyo qalabaysan in ay la tacaalaan gurmadyada, waana in aad isticmaashaa. Hase yeeshee, markii ay musiibo weyni dhacdo ka dib adiga iyo bulshada ayaa xoogaa qaddar ah ay tahay in aad xaaladda keli ku ahaataan, sababtuna waxaa weeye baaxadda aagga ay wax ka dheceen, isgaarsiinta go'day, iyo jidadka oo aan la mari karaynin.

Tababbarka CERT waxaa loogu talaggalay in uu kuu diyaariyo in aad naftaada, qoyskaaga iyo derisyadaadaba caawiso haddii ay dhacdo musiibo baaxad weyn leh. Sababta oo ah in aanay shaqaalaha gurmada qof waliba isla markiiba caawin karayn awgeed, waxaad tari kartaa wax weyn tiyoo aad tababbarka Buuggan Ardayga ku qoran isticmaalaysid si aad naf iyo maalba u bedbaadisid.

Tababbarkani wuxuu daboolaa xirfadaha asaasiga ah ee muhiimka ay tahay in la ogaado inta lagu jiro musiibo oo aanan markaa adeegyo gurmada la heli karaynin. Tababbar iyo waxqabad iyo wadashaqayn sidii kooxeed waxaad ku wax weyn oo wanaagsan ugu samayn kartaa dadka ugu badan ee musiibo ay ku habsatay, adigoo naftaada ka ilaalinaya in aad noqoto mid ay dhibtu ku dhacdo oo ay wax gaaraan.

MARKA AY MUSIIBO DHACDO

Burburka ay sababaan musiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa dad-samee-ga ah sida dhulgariirrada, harikaynta, torneedada, daadadka, iyo argaggixisannimadu waxay saamayn ku yeelan karaan dhamaan qaybaha bulshada iyo dawladdaba. Dhacdooyinkaasi waxay:

- Si ba'an u xaddidaan ama qarqiyaan sahayda waxqabad, isgaarsiinta, gaadiidka, iyo yutiilitiga.
- Shakhsiyaad badan iyo dersaal ka jaraan caawintii dibedda ka iman lahayd.

Waqti bay ku qaadanaysaa hay'adaha waxka-qabadka musiibooyinka in ay is abaabulaan oo isu diyaariyaan waxqabad habaysan, jidadka burbursan iyo isgaarsiinta go'anina waxay xaddidaan galaangalkii ay ku tegi lahaayeen meelaha ay musiibadu sida aadka ah u saamaysay. Sidaa darteed, waqtiga hore ee markiiba ka dambeeya musiibada—badanaa ilaa 3 beri am aka badan—shaqsiyaadka, qoysaska, iyo dersaashu waa in ay ku tiirsanaadaan wixii ay haysteen oo ah:

- Cunto.
- Biyo.
- Gargaarka Koowaad.
- Hooy.

Diyaarsanaan shaqsi, qorshayn, xirfado lagu waaro, iyo iscaawin derisyada iyo meelaha shaqooyinka ah oo dhaca waqtiga billowga ah ee hore ayaa dhamaantood ah tallaabooyinka muhimka u ah in lala qabsado xaaladda musiibada ka dambaysa.

DIYAARSANAANTA BULSHADA

Qorshaynta diyaarsanaanta bulshada ku salaysan ayaa inoo suuroggelisa in aannu u diyaargarowno waxna ka qabanno qash-qashaadaha iyo khatarta iman karta ee inta badan timaadda marka ay musiibo dhacdo. Ka shaqsi-shaqsi ahaan, waxaannu guryaheenna u diyaarin karraa waqtigaa adag. Iyadoo horay loogu diyaargarobayo musiibada iman karta, ayay dersaasha iyo goobaha shaqooyinku yarayn karaan dhibaatooyinka naf iyo maal ee iman karaysa. Diyaarsanaanta dersaasha wuxuu sare u qaadayaa awoodda ay shakhsiyaaasha iyo dersaashu u leeyihiin in ay yareeyaan baahidooda dhinaca gurmada si ay u maareeyaan khayraadka yaalla inta caawin xirfadaysani ay noqonayso mid la heli karo.

Cilmi-baaris hab-dhaqanka lagu sameeyey ayaa muujisay in kooxaha wadajirka u shaqaynaya waqtiga musiibada ay aad u waxgalsan yihiin marka ay sii jirtey u diyaar-garow musiibada horay loogu diyaar-garobay. Cilmi-baaris yadaasi waxay muujinayaan in abaabullaanta heer qoys in ay aad guulo u keenaan haddii ay ku dhafan yihiin hab-dhismeedka bulshada iyo kulannada umadda sida —ururrada derisyada, dugsiyada, goobaha shaqada, meelaha cibaadada, iyo ururrada kale ee jira.

Wax-ka-qabad la taaban karo ayaa sidaa darteed u baahan qorshe aad u macquul ah iyo wada-agaasin ka dhexeeya dadka arrinta ku lug yeelan doona oo dhan sida—dawladda, kooxaha mutaddawiciinta, meheradaha gaarka loo leeyahay, dugsiyada, iyo ururrada bulshada. Haddii la haysto xog iyo tababar, shaqsiyaadka iyo bulshooyinku waxay u diyaar-garobi karayaan in ay noqdaan xoog awood u leh in ay wax qabad badan sameeyaan markii ay musiibo dhacdo wax aad u yar ka dib. Barnaamijka Kooxda Waxkaqabashada Xaaladda Degdegga ah ee Bulshada (CERT) waxaa loogu talaggalay in ay bulshooyinka ku caawiyaan in ay si wanaagsan ugu diyaar-garobaan wax-qabad musiibo oo micno leh oo ku imanaya tababar iyo qorshayn.

SIDA AY CERTYADU U HAWLGALAN

Mar haddii ay CERT waliba u abaaabulan tahay una tababbaran tahay si ku aaddan hannaan gaar ah oo ay dejisay hay'adda caawinaysa, xubnahoodu waxay xushaan hoggaamiye kooxeed iyo ku sime waxaanay isla gartaan meel ay ku kulmaan, ama meel *is-diyarined* oo ay tahay in la isticmaalo haddii ay lacalla musiibo dhacdo.

Meesha diyaargarowgu waa meesha ay waaxda dabdemiska iyo adeegyada kale kala jaanqaadi doonaan CERTyada. In ay jirto bar dhexe oo laga xiriiro waxay suuroggelisaa in qiimaynta burburka la gudbiyo oo markaana mutaddawiciinta iyo sahaydaba si micno leh loogu qaybiyo.

Burburka ay musiibadu keento meeluhu waxay u kala duwanaan karaan si weyn. Msiibo dhab ahi markay dhacdo, CERTyada waxaa loo diraa si isxig-xigta oo ay baahiduna keenayso. Xubnaha waxaa la baraa in ay marka hore qiimeeyaan baahidooda iyo tan ku sugan agaggaarradooda.

Xubnaha CERT ee hawl la'aan kala kulma meelaha loo diray waxay markaa ku soo laabtaan kobta diyaar-garowga si loogu xilsaaro door kale oo ay keentay baahida guud ee aagga. Xubnaha iyagu la kulma shaqo aad uga culays badan awooddooda waxay wargeeyo u diraan meesha diyaargarowga si gurmadii la heli karo loogu soo diro. *Ham* iyo CB raadiyaha halaw-halawga ayaa loo isticmaali karaa si loo hagaajiyo awoodda is-gaarsiinta iyo agaasinkaba.

Barnaamijka CERT wuxuu bixin karaa waxqabad hore oo degdeg ah. Marka hore si shaqsi-shaqsi ah, dabadeedna xubno kooxeed ahaan, ayay xubnaha CERT ee mutaddawiciinta ahi waxay ku kala yaaci karaan aagagga loogu taloggalay, iyagoo dababka yaryar deminaya, oo guryaha burburku gaaray ka deminaya tuubbooyinka gaaska dabiiciga ah, qabashada goobidda iyo samatabbixinta yaryar, iyo qabashada daweynta asaasiga ah. Mutaddawiciinta tababbaran waxay sidoo kale xoog la isku hallayn karo taartaan ururrada adeegga marka lagu jiro hawlaha aan halista badnayn sida taageerada hooyga, xakamaynta dadka farada badan, iyo raridda dadka.

BARNAAMIJKA TABABBARKA EE CERT

Inta lagu jiro 9ka cashar ee soo socota, waxaa lagu tababbari doonaa hawlo iskaa-wax-u-qabso oo isu-gargaar dhinaca gurmada ah ee kala ah:

- U diyaarsanaanta Musiibada.
- Nabdoonaanta dabka.
- Hawlgallada musiibo ee caafimaadka (2 cashar).
- Goobid iyo samatabbixin khafiif ah.
- Abuubulka Ururka CERT.
- Cilmu-nafsiga Musiibada.
- Argaggixisannimada iyo CERT.

Fasallada waxaa wax ka dhigaya shaqaale musiibada u tababbaran oo ay ku jirto dab-deminta iyo Shaqaalaha Adeegga Caafimaadka (EMS.). Barnaamijku wuxuu ka kooban yahay 20 saacadood oo tababbar ah wuxuuna diiradda saarayaa hawl gacan-ku-qabad ah.

BARNAAMIJKA TABABBARKA EE CERT (WELI SOCONAYA)

Tababbarka CERT wuxuu u qaybsan yahay 9 cutub oo ka hadlaya mawduucyada soo socda:

| Cutub | Mawduuca laga Hadlayo |
|---|---|
| 1. U diyaarsanaanta Musiibada | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Soo dhawryn/arar ▪ Gurmadyada iyo Musiibooyinka Dhacay Mar Dhaw ▪ Dulmaridda Koorsada ▪ Musiibooyinka iyo Shaqaalaha Musiibada ▪ Raad-reebka Kaabayaasha ▪ Khataraha Dhismeyaasha iyo Dululaatiyada ▪ Dhimista Halisaha ▪ Diyaarsanaanta Hoyga iyo Goobta Shaqada ▪ Diyaarsanaanta Bulshada ▪ Ilaalinta Shaqaalaha Musiibada |
| 2. Nabdoonaanta Dabka | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Kemisteriga Dabka ▪ Yaraynta Khatarta Dabka Guriga iyo Goobta Shaqada ▪ Maaddooyinka Halista ah ▪ Qaynaynta CERT ▪ Sahayda Dab-Deminta ▪ Nabdoonaanta Dab Xakamaynta |
| 3. Hawlgallada Daweynta ee Musiibada Qaybta 1 | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Daweynta Xaaladaha Nafgooyada ah ▪ Kala-sooc/eegid |
| 4. Hawlgallada Daweynta ee Musiibada Qaybta 2 | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Tixgelinaha Caafimaadka Bulshada ▪ Hawlqabadka Hawlgallada Daweynta Musiibada ▪ Sameynta Aagagga Daweynta ▪ Sameynta Qiimaynta Madax ilaa Lugo ▪ Daweynta Gubashooyinka ▪ Daryeelka Dhaawaca ▪ Daweynta Jabka, Murgacashada, iyo Dillaaca ▪ Kabidda ▪ Dhaawacyada Sanka ▪ Daweynta Barafowga |
| 5. Hawlgallada Goobidda iyo Samatabbixinta | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Qaymaynta Goobidda iyo Samatabbixinta ▪ Samaynta Hawlgallada Goobidda ▪ Samaynta Hawlgallada Samatabbixinta |
| 6. Ururka CERT | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Ururka CERT ▪ Go'aan-qaadashada CERT ▪ Diiwaaninta |
| 7. Cilmu-nafsiga Musiibada | <ul style="list-style-type: none"> ▪ Bed-qabka Kooxda ▪ La Shaqaynta Hurgumada Waaraha |

THE CERT TRAINING PROGRAM (CONTINUED)

| Cutub | Mawduuca laga Hadlayo |
|---|--|
| 8. Argaggixisanimada iyo CERT | <ul style="list-style-type: none">▪ Waa maxay Argaggixisannimo▪ Bartilmaameedyada Argaggixisada▪ Hubka Argaggixisada▪ Muujiyeyaasha B-NICE▪ Diyaarsanaanta Hoyga iyo Shaqada▪ CERTyada iyo Dhacdooyinka Argaggixisanimada |
| 9. Muraajicaynta Koorsada iyo Jilidda Musiibada | <ul style="list-style-type: none">▪ Muraajicaynta Koorsada▪ Jilidda Musiibada |

Markii aad dhamayso koorsada, waxaad qaadan doontaa shahaado, waxaa kaloo aad qaadan kartaa aqoonsi muujinaya in aad tahay xubin ka mid ah koox wax-ka-qabasho musiibo inta lagu jiro wax-ka-qabad musiibo. Waa inaad haysataa qalab nabdoonaaneed oo dheeraad ah sida ookiyaaleyaal, galoofyo, iyo sahayda asaasiga ah, waana in ay kuugu diyaarsan yihiin in aad isticmaasho markii ay musiibo dhacdo. (Haddii aad xubin ka tahay koox tababbar oo meherad ama meel waxsoo-saar, haybta aad u shaqayso ayaa ku siin karaysa alaabtaas.)

Tababbarka wax-ka-qabadka musiibo waa in aanu noqon munaasabad mar qur ah dhacda. Ka warhaynta, u diyaarsanaanta, iyo xirfadaha waa in lagu xoojiyaa tababbarro is daba socda iyo qabasho lagu celceliyo si loo joogteeyo u diyaarsanaanta caaradka ah ee loo baahan yahay si loo waajaho musiibo. Si aad u xagsato xirfadda aad baratay oo aad weliba si joogto ah u hagaajiso hawl-qabadkaaga, adiga iyo kooxdaadu waa in aad ka qayb-qaadataan tababbarrada dheeraadka ah ee joogtada ah markii lagu qabto aagga aad deggan tahay. Kula shaqaynta kooxaha kale idinkoo ku tababbaranaya musiibo la mala-awaalay waxay bixinaysaa fursado aan ku ekayn gacan ku hayn hawleed, laakiin qiime u leh wada-shaqaynta iyo ku xirraanta kooxaha kale ee aaggaaga hoose ka jira.